# Qarashka Xannaanada Ilmaha ee California/Wada-xiriirrada Habka Beddelkaa/Tusmada Farriimaha

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (Department of Social Services) waxay la shirakowday Prenatal to Five Fiscal Strategies si loo naqshadeeyo loona hirgeliyo nidaam hab beddel ah laguna wargeliyo sicirrada lacag-bixinta ee la-kabo.

Inta lagu jiro xagaaga iyo deyrta 2023, P5 waxa ay maamuli doontaa ra'yi-aruurin khadka ah iyadoo martigelin doonta kulamo ra'yi-bixin (warbixin) ah si loo maqlo adeeg-bixiyeyaasha xannaanada hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xarumaha xannaanada ilmaha iyo horumarinta, guryaha xannaanada carruurta qoyska, barnaamijyada Qabiilka, iyo kuwa u xannaaneeya qoyska, saaxiib, ama deriska oo ka reeban shatiga, waxay daneeyaan kharashaadkooda iyo hawlgaladooda. Tusmadaan waxaa lagu taageerayaa wacyigelinta lagu taageero ka qaybgalka adeeg-bixiyaha iyo ka qaybgalka Habka Beddelka ah ee California / Qarashka Habka Xannaanada Ilmaha.

Macluumaadkaan waxa ku jira iimeelo wacyigelin oo tusaale ah, joornaal/afka/luuqadda khad-ku-faafinta, sawirada baraha bulshada iyo qoraalada, iyo sidoo kale macluumaad mashruuc sida ogeysiin, koobida mashruuca, kaadhka boostada ee daabacaadda, Su'aalaha Inta badan La-isweydiiyo iyo liiska diiwaangalinta kulanka ra'yi-bixinta oo dhamaystiran. Macluumaadka si gaar baa loo habbeyn karaa looguna tafatiri karaa xagga qoraalka iyo suuq-gelinta. Inta badan macluumaadkaan waxaa lagu bixiyaa Ingiriis, Isbaanish, Shiineys dhaqameed, Shiineys la Fududeeyay, Carabi, Ruush, iyo Soomaali.

## Miiska Tusmada:


**I. Iimeel Wacyigelin – Kulamada Ra'yi-aruurinta iyo Ra'yi-bixinta (dheer)......2**

**II. Iimeel Wacyigelin Fudud –Kulamada Ra'yi-aruurinta iyo Ra'yi-bixinta (kooban)......3**

**III. Joornaal Tusaale ah/Xayeysiis Qoraal Khad-ku-faafin ah......4**

**IV. Macluumaadka/Qoraalka Baraha Bulshada......5**

**V. Macluumaad Kale:......8**

- **a. Khulaasada Mashruuca......8**
- **b. Ogeysiiska Ra'yi-aruurinta iyo Kulamada Ra'yi-bixinta......8**
- **c. Ra'yi-aruurinta iyo Kaadhka Boostada ee Kulanka Ra'yi-bixinta......9**
- **d. Su'aalaha Inta Badan La-isweydiiyo......10**

# I. Iimeel Wacyigelin – Kulamada Ra'yi-aruurinta iyo Ra'yi-bixinta (dheer)

Mawduuca: Wadaag Codkaaga si Lagu Wargeliyo Sicirrada *(qiimaha)* La-kabo ee Xannaanada Ilmaha!

**California waxay beddeleysaa sida ay qarashka xannaanada ilmaha u bixiso!**

Ku dhisidda Qarashka Daraasadda Tayada ee la dhammeeyey sannadkii hore, Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) waxay la shaqaynaysaa Prenatal to Five Fiscal Strategies (P5) si loo naqshadeeyo loona hirgeliyo hannaanka hab beddel ah si:

1. Si fiican loogu fahmo inta uu le'eg yahay kharashka adeeg-bixiyayaasha ku kaca si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho hore oo tayo sare leh kuna sii jiraan ganacsiga.
2. Loo sameeyo nidaam kaa caawinaya qiyaasida qarashka dhabta ah ee xannaanada ku salaysan doorsoomayaal sida cabbirka barnaamijka, goobta juqraafiga, iyo da'da carruurta loo adeego taas oo loo isticmaali karo in lagu wargeliyo dejinta sicirka.

**Waxaan u baahanahay inaan kaa maqalno!** Codkaaga ka dhig mid la maqlo adiga oo ka qayb galaya Kulan Ra'yi-bixin Maqal iyo Muuqaal ah iyo adiga oo buuxinaya Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Xannaanada Ilmaha. Tan waa fursadaada aad ku wadaagi karto Qarashka dhabta ah si aad u bixiso daryeel caruur oo tayo leh – ma aha oo keliya waxa ay qoysasku awoodi karaan.

Kulamada ra'yi-aruurinta iyo ra'yi-bixinta ayaa u oggolaanaya adeeg-bixiyeyaasha xannaanada hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xannaanada carruurta iyo xarumaha horumarinta, guryaha xannaanada carruurta qoyska, barnaamijyada qabiilka, iyo adeeg-bixiyayaasha xannaanada qoyska, saaxiibka, ama deriska ee shatiga laga dhaafo inay wadaagaan kharashyada hadda jira iyo kharashka dhabta ah ee xannaanada .

*Ra'yi-aruurinta ayaa lagu heli karaa luuqado badan. Kulamada ra'yi-bixinta ayaa lagu qaban doonaa Ingiriisi iyo Isbaanish (iyo luuqado kale hadba sida loo codsado, haddii ay suurtagal tahay). Haddii aad buuxisay Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Tayada ee 2022 oo aad rabto in aan dib u isticmaalno xogtaada ra'yi-aruurintaas, fadlan noogu soo dir iimeel california@prenatal5fiscal.org wata magacaaga, magaca barnaamijka, iyo macluumaadkaaga xidhiidhka.*

**ISKU-DIIWAANGELI**
**KULAMO RA'YI-BIXIN oo MAQAl iyo MUUQAAL ah**

**QAADO**
**RA'YI-ARUURINTA QARASHKA XANNAANADA ILMAHA**

**Ka-qeybgaleyaasha buuxiya ra'yi-aruurinta kana qeybgala kulamada ra'yi-bixinta waxaa la gelin doonaa bakhtiyaa-nasiib!**

*Prenatal to Five Fiscal Strategies ayaa sameynaysa daraasaddaan oo dhammaan xogta waa la xifdin doonaa sir ahaan laguma xiri doono hal qof ama barnaamij.*

Bog-khadka: www.prenatal5fiscal.org/california
Iimeelka: california@prenatal5fiscal.org
Foonka: (217) 469-5250

## II. Iimeel Wacyigelin Fudud –Kulamada Ra'yi-aruurinta iyo Ra'yi-bixinta (kooban)

Mawduuca: Wadaag Codkaaga si Lagu Wargeliyo Sicirrada La-kabo ee Xannaanada Ilmaha!

Marka gobolku tixgalinayo habab cusub ee lagu dejiyo sicirrada ka-bidda xannaanada ilmaha ee gobolka, **ka dhig codkaaga mid la maqlo** adigoo buuxinaya **Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Adeeg-bixiyaha Xannaanada Ilmaha** kana qaybgalaya **Kulan Ra'yi-bixin Maqal iyo Muuqaal ah**. Tan waa fursadaada aad ku wadaagi karto Qarashka dhabta ah si aad u bixiso daryeel caruur oo tayo leh - ma aha oo kaliya waxa ay qoysasku awoodi karaan.

| |
|---|
| Haddii aad buuxisay Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Tayada ee 2022 oo aad rabto in aan dib u isticmaalno xogtaada ra'yi-aruurintaas, fadlan noogu soo dir iimeel california@prenatal5fiscal.org wata magacaaga, magaca barnaamijka, iyo macluumaadkaaga xidhiidhka. |

*Ra'yi-aruurinta ayaa lagu heli karaa luuqado badan. Kulamada ra'yi-bixinta ayaa lagu qaban doonaa Ingiriisi iyo Isbaanish (iyo luuqado kale hadba sida loo codsado, haddii ay suurtagal tahay). Wax badan ka ogow hannaanka.*

**ISKU-DIIWAANGELI**
**KULAMO RA'YI-BIXIN oo MAQAl iyo MUUQAAL ah**

**QAADO**
**RA'YI-ARUURINTA QARASHKA XANNAANADA ILMAHA**

**Ka-qeybgaleyaasha buuxiya ra'yi-aruurinta kana qeybgala kulamada ra'yi-bixinta waxaa la gelin doonaa bakhtiyaa-nasiib!**

*Prenatal to Five Fiscal Strategies ayaa sameynaysa daraasaddaan oo dhammaan xogta waa la xifdin doonaa sir ahaan laguma xiri doono hal qof ama barnaamij.*

Bog-khadka: www.prenatal5fiscal.org/california
Iimeelka: california@prenatal5fiscal.org
Foonka: (217) 469-5250

## III. Joornaal Tusaale ah/Xayeysiis Qoraal Khad-ku-faafin ah

**WADAAG CODKAAGA SI LAGU WARGELIYO SICIRRADA LA-KABO ee XANNAANADA ILMAHA!**

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) iyo Prenatal to Five Strategies Fiscal Fiscal (P5) waxay ka raadinayaan ra'yi-bixin ku saabsan **qarashka xannaanada ilmaha** ee adeeg-bixiyeyaasha xannaanada hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xannaanada carruurta iyo xarumaha horumarinta, xannaanada carruurta guryaha qoyska, barnaamijyada qabiilka, iyo adeeg-bixiyayaasha xannaanada qoyska, saaxiibka, ama deriska ee shatiga laga dhaafay, **si ay gacan uga geystaan wargelinta sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha**.

**Waxaan u baahannahay inaan kaa maqalno!** Codkaaga ka dhig mid la maqlo adiga oo ka qayb galaya **Kulan Ra'yi-bixin Maqal iyo Muuqaal ah** iyo adigoo buuxinaya **Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Xannaanada Carruurta**. Tan waa fursadaada aad ku wadaagi karto Qarashka dhabta ah si aad u bixiso daryeel caruur oo tayo leh – ma aha oo kaliya waxa ay qoysasku awoodi karaan.

| |
|---|
| Haddii aad buuxisay Qarashka CA ee Ra'yi-aruurinta Tayada ee 2022 oo aad rabto in aan dib u isticmaalno xogtaada ra'yi-aruurintaas, fadlan noogu soo dir iimeel california@prenatal5fiscal.org wata magacaaga, magaca barnaamijka, iyo macluumaadkaaga xidhiidhka. |

*Ra'yi-aruurinta ayaa lagu heli karaa luuqado badan. Kulamada ra'yi-bixinta ayaa lagu qaban doonaa Ingiriisi iyo Isbaanish (iyo luuqado kale hadba sida loo codsado, haddii ay suurtagal tahay). Wax badan ka ogow hannaanka.*

**ISKU-DIIWAANGELI**
**KULAMO RA'YI-BIXIN oo MAQAl iyo MUUQAAL ah**

**QAADO**
**RA'YI-ARUURINTA QARASHKA XANNAANADA ILMAHA**

**Ka-qeybgaleyaasha buuxiya ra'yi-aruurinta kana qeybgala kulamada ra'yi-bixinta waxaa la gelin doonaa bakhtiyaa-nasiib!**

*Prenatal to Five Fiscal Strategies ayaa sameynaysa daraasaddaan oo dhammaan xogta waa la xifdin doonaa sir ahaan laguma xiri doono hal qof ama barnaamij.*

Bog-khadka: www.prenatal5fiscal.org/california
Iimeelka: california@prenatal5fiscal.org
Foonka: (217) 469-5250

## IV. Macluumaadka/Qoraalka Baraha Bulshada

**Sawirrada Baraha Bulshada Tusaale –** La isticmaal qoraallada tusaalaha ah ee hoose:




Qoraallada baraha bulshada ee tusaalaha ah waxaa loo isticmaali karaa sida ay yihiin ama wax baa laga beddeli karaa si loo waafajiyo suuq-gelinta hay'addaada oo sawirro wata ama aan wadan.

| **Tusaalaha Qoraallada Baraha Bulshada La Geliyo – Facebook, LinkedIn, iyo Twitter** | |
|---|---|
| ***Facebook/LinkedIn Gelin 1*** | **Wadaag Codkaaga si Lagu Wargeliyo Sicirrada La-kabo ee Xannaanada Ilmaha!**<br>California waxay ka fakareysaa qaabab cusub oo lagu dejiyo sicirrada la-kabo ee xannaanada ilmaha gobolka. Haddii aad tahay adeeg-bixiye gobolka ka jira, codkaaga ka dhig mid la maqlo adiga oo ka qayb galaya Kulan Ra'yi-bixin Maqal iyo Muuqaal ah iyo adiga oo buuxinaya Qarashka Ra'yi-aruurinta Xannaanada Carruurta ee CA. Tan waa fursadaada aad ku wadaagi karto Qarashka dhabta ah si aad u bixiso daryeel caruur oo tayo leh – ma aha oo kaliya waxa ay qoysasku awoodi karaan in ay bixiyaan.<br>Warbixin dheeraad ah baa ku jirta www.prenatal5fiscal.org/california |
| ***Facebook/LinkedIn Gelin 2*** | **Ma tahay adeeg-bixiye xannaano Ilmo oo ka shaqeeya California?**<br>Hadday haah tahay, Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) iyo Prenatal to Five Fiscal Strategies (P5) waxay rabaan inay kaa maqlaan! Gobolku waxa uu ka fikirayaa habab cusub oo lagu dejiyo sicirrada la-kabo ee xannaanada ilmaha waxaana la aruurinaya warbixinta dhammaan noocyada adeeg-bixiyayaasha xanaanada ilmaha ee gobolka oo dhan si loo wargeliyo dadaalkaan. Waxaad buuxin kartaa Kharashka CA ee Ra'yi-aruurinta Adeeg-bixiyaha Xannaanada Ilmaha oo aad ka qaybqaadan kartaa Kulan Ra'yi-bixin |

| | |
|---|---|
| | Maqal iyo Muuqaal ah waxaana lagu gelin karaa bakhtiyaa-nasiib si aad ugu guulaysato boono $100 ah oo aad ku kharash garayso Kaplan Early Learning.<br><br>Hubi in codkaaga lagu daro daraasaddaan muhiimka ah! Faahfaahin dheeraad ah, booqo www.prenatal5fiscal.org/california |
| ***Twitter/Threads Gelin 1*** | Waxaa loo wacayaa kulli adeeg-bixiyeyaasha California! Gobolku wuxuu ku fakarayaa qaabab cusub oo lagu dejiyo sicirrada la-kabo ee xannaanada ilmaha wuxuuna doonayaa talo-bixintaada. Qaado ra'yi-aruurinta khadka kana qeybgal kulan ra'yi-bixin maqal iyo muuqaal ah. Macluumaad dheeraad ah ayaa ku jira www.prenatal5fiscal.org/california. |
| ***Twitter/Threads Gelin 2*** | Qarashka dhabta ah ee xannaanada ilmaha aad ayuu uga sarreeyaa inta qoysasku ay awoodi karaan. Haddii aad tahay adeeg-bixiye xannaano ilmo ee California, buuxi Kharashka Ra'yi-aruurinta Adeeg-bixiyaha Xannaanada Ilmaha oo ka qayb qaado kulan ra'yi-bixin maqal iyo muuqaal ah si aad ula wadaagto khibradaada ku saabsan kharashka dhabta ah ee xannaanada ilmaha iyada oo gobolku uu doonayo inuu beddelo sida uu u dejiyo sicirka la-kabo: www.prenatal5fiscal.org/california. |
| ***Twitter/Threads Gelin 3*** | Adeeg-bixiyeyaasha xannaanada ilmaha waxay ogyihiin in qoysasku aysan awoodin inay iska bixiyaan kharashka dhabta ah ee xannaanada ilmaha. California waxay ka fakareysaa inay beddesho sida ay u go'aamiso sicirrada la-kabo ee xannaanada ilmaha - si loogu saleeyo kharashka dhabta ah ee xannaanada, oo aysan ahayn waxa qoysasku awoodi karaan. Laakiin gobolku wuxuu u baahan yahay inuu kaa maqlo! La wadaag fikradahaaga iyo khibradaada si aad u hubiso in codkaaga lagu daro hannaankaan cusub. Macluumaad dheeraad ah ka fiiri: www.prenatal5fiscal.org/california |
| ***Qoraal Guud:<br><br>Kulli adeeg-bixiyeyaasha 1*** | Waxaan rabnaa in aan ka maqalno dhammaan adeeg-bixiyeyaasha xannaanada hore iyo waxbarashada iyo mulkiilayaasha si ay u caawiyaan wargelinta sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha. Buuxi ra'yi-aruurinta khadka ee gaaban iskuna diiwaangeli kulan ra'yi-bixin maqal iyo muuqaal ah maanta!<br><br>Wax badan ka ogow hannaanka halkaan www.prenatal5fiscal.org/california! |
| ***Qoraal Guud:<br><br>Kulli adeeg-bixiyeyaasha 2*** | Waxaa loo wacayaa dhammaan adeeg-bixiyeyaasha xannaanada ilmaha iyo milkiilayaasha! Ogeysii sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha ee California adiga oo la wadaagaya khibradaada ku shaqaynta barnaamijka xannaanada ilmaha.<br><br>Buuxi Kharashka California ee Ra'yi-aruurinta Xannaanada Ilmaha oo isku diiwaangeli kulan ra'yi-bixin!<br><br>Wax badan ka ogow hannaanka: www.prenatal5fiscal.org/california! |
| ***Qoraal Guud:<br><br>Kulli adeeg-bixiyeyaasha 3*** | La wadaag kharashyadaada iyo khibradahaaga ku shaqeynta barnaamijka xannaanada iyo horumarinta ilmaha, guriga xannaanada ilmaha qoyska, barnaamijka qabiilka, ama bixinta xannaanada qoyska, saaxiibka, ama deriska ee aan shatiga laga rabin. |

| | |
|---|---|
| | Buuxi Kharashka California ee Ra'yi-aruurinta Xannaanada Ilmaha oo isku diiwaangeli kulan ra'yi-bixin!<br><br>Wax badan ka ogow hannaankaan: www.prenatal5fiscal.org/california! |
| ***Qoraal Guud:***<br><br>***Kulli adeeg-bixiyeyaasha 4*** | California waxay beddeleysaa sida ay qarashka xannaanada ilmaha u bixiso waxaana u baahannahay talo-bixintaada!<br><br>Wargeli sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha ee California adiga oo la wadaagaya khibradaada ku shaqaynta barnaamijka xannaanada ilmaha. Buuxi Kharashka California ee Ra'yi-aruurinta Xannaanada Ilmaha oo isku diiwaangeli kulan ra'yi-bixin!<br><br>Wax badan ka ogow hannaanka halkaan: www.prenatal5fiscal.org/california! |
| ***Qoraal Guud: Adeeg-bixiyeyaasha Guri ee Xannaanada Ilmaha Qoyska*** | Ma tahay adeeg-bixiye xannaano ilmo ee qoys? Buuxi Ra'yi-aruurinta Kharashka California ee Xannaanada Ilmaha ee / Habka Beddelka ah oo ka qaybgal kulan talo-bixin si aad u caawiso in lagu wargeliyo sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha.<br><br>Wax badan ka ogow hannaanka halkaan www.prenatal5fiscal.org/california! |
| ***Qoraal Guud:: Adeeg-bixiyeyaasha Xannaanada Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska*** | Ma daryeeshaa ilmo qoys, saaxiib, ama deris? Waxaan kugu casumaynaa inaad ka warranto sicirrada lacag-bixinta la-kabo ee xannaanada ilmaha adoo buuxinaya ra'yi-aruurinta oo ka qaybqaadanaya kulan ra'yi-bixin!<br><br>Wax badan ka ogow hannaanka halkaan www.prenatal5fiscal.org/california! |

## V. Macluumaad Kale:

### a. Khulaasada Mashruuca

*Soo-koobid mashruuc oo hal bog ah oo qeexeysa yoolalka iyo hannaanka California ay u fulinayso habka beddelka ah.*



Habka Beddelka ah ee Kaliforniya

KALIFORNIYA WAXAY BEDDELAYSAA SIDA AY U BIXISO KHARASHAADKA DARYEELKA CARRUURTA!

Si loo kordhiyo natiijooyinka wanaagsan ee carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha bixiyaha daryeelka hore iyo waxbarashada, California waxay dejin doontaa sicirada lacag bixinta kaalmada daryeelka carruurta oo lagu wargelinayo kharashaadka daryeelka, iyadoo laga guurayo sicirka suuqa.

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) waxay la shaqaynaysaa khubaro heer qaran ah, Prenatal to Five Fiscal Strategies (P5), si ay u qaabeeyaan oo ay u hingeliyaan geedi-socodka habka beddelka ah.

HABKA

Geedi-socodka habka beddelka ah ee CA ayaa Gobolka ka caawin doona:

- Fahmidda qarashka ku baxa adeeg-bixiyayaasha iyo barnaamijyada inay bixiyaan adeegyada daryeelka iyo waxbarashada.
- Samaynta qalab gacan ka geysan doona in la qiyaaso qarashka daryeelka iyadoo lagu salaynayo macluumaadka laga soo ururiyay adeeg-bixiyayaasha iyo ilo kale. Qalabkani wuxuu qiyaasi doonaa qarashka daryeelka ee noocyada kala duwan ee barnaamijyada iyadoo la isticmaalayo doorsoomayaal sida cabbirka barnaamijka, goobaha juqraafiyeed, iyo da'da carruurta loo adeego.

**Waxa jira Shan Waji oo Geedi-socodka Habka Beddelka ah:**

1. La xiriirista qoysas kala duwan, adeeg-bixiyeyaasha, iyo bulshooyinka.
2. Macluumaad aruurin iyada oo loo marayo ra'yi-aruurin, kal-fadhiyo fikrad dhiibasho, iyo ilo kale.
3. Samaynta qalab isticmaala macluumaadkaas si loo qiyaaso qarashka daryeelka.
4. Daraaseynta natiijooyinka si loo fahmo kala duwanaanshaha qarashka daryeelka.
5. Wax ku biirinta sida uu gobolku u dejiyo qarashyada iyo shuruucda.

1 Ka qaybgeli adeeg-bixiyaysasha, qoysaska, iyo bulshada
2 Aruuri ra'yi-bixin oo ururi Xogta
3 Samee Qaabka Qaranshka
4 Dhagangeli Isku-dhafka
5 Shuruucda iyo Dejinta Qarashka waxaa lagu wargeliyay

KA-QAYBGELINTA

CDSS iyo P5 waxay la hawlgeli doonaan oo ay baran doonaan adeeg-bixiyeyaasha/shaqaalaha daryeelka hore iyo waxbarashada, qoysaska, iyo hawlgalayaasha ku sugan Gobolka oo dhan, gaar ahaan kooxaha jinsiyad, qowmiyad, iyo luqad ahaanba matalaadoodu yar tahay, kuwaas oo ku nool gobollada juqraafi ahaan aan si fiican loogu adeegin, iyo bulshooyinka la takooro.

Si loo fahmo qarashka saxda ah ee daryeelka, CDSS iyo P5 waxay fikrad dhiibasho iyo ka qaybqaadasho uga baahan doonaan adeeg-bixiyayaasha kala duwan ee daryeelka hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xarumaha daryeelka iyo kobcinta carruurta, guryaha daryeelka carruurta qoyska, barnaamijyada qabiilka, iyo daryeel-bixiyeyaasha qoyska, saaxiibada, ama deriska ah ee aan laysin laga rabin iyo sidoo kale qoysaska. CDSS iyo P5 waxay bixin doonaan fursado badan oo ka qaybqaadasho inta lagu jiro shanta weji ee geedi-socodka habka beddelka ah.

*Xogta waxa kaliya oo loo wadaagi doonaa si kooban oo xogta barnaamijka gaarka ah waxa lagu ilaalin doonaa sir oo aan lala wadaagin wixii ka dambeeya P5*

**Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka & Tayada**

CDSS waxay samaysay Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka & Tayada ee Kaalifoorniya si ay Gobolka u siiyaan talo ku saabsan dejinta sicirka kaalmada daryeelka carruurta. P5 waxa ay daadi'inaysaa kulamada guddiyada, kuwaas oo dhici doona labadii biloodba mar, waana kulamo u furan dadweynaha, waxaana lagu dari doonaa wakhti loogu talagalay in dadweynaha ku dhiibtaan fikradooda/faallooyinkooda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Guddiga, oo ay ku jiraan faahfaahinta kulamada iyo wixii macluumaad ah, iyo sida looga qeybqaadan karo ayaa laga heli karaa halkaan hoose.

MACLUUMAA DHEERAAD AH

**Kulamada Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka iyo Tayada:** https://cdss.ca.gov/inforesources/child-care-and-development/rate-reform-and-quality

**Si aad u hesho wixii macluumaad ah ee ku saabsan habka beddelka ah, iyo si aad ula xiriirto P5, booqo:** http://www.prenatal5fiscal.org/california

- English
- Spanish
- Simplified Chinese
- Traditional Chinese
- Arabic
- Russian
- Somali

### b. Ogeysiiska Ra'yi-aruurinta iyo Kulamada Ra'yi-bixinta

*Ogeysiis lagu taageero wacyigelinta adeeg-bixiyaha xannaanada hore iyo waxbarashada si loo buuxiyo Kharashka Xannaanada Ilmaha/Habka Beddelka ah ee ra'yi-aruurinta khadka iyo isku-diiwaangelinta kulamada ra'yi-bixinta maqalka iyo muuqalka ah.*



QARASHKA DARYEELKA CARRUURTA ee CA

NALA WADAAG ARAGTIDAADA SI AAD WAX UGA DHAHDO SICIRADA KAALMADA DARYEELKA CARRUURTA!

Kaliforniya waxay bedelaysaa sida ay u bixiso kharashaadka daryeelka carruurta!

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (California Department of Social Services, CDSS) iyo Prenatal to Five Strategies (P5) waxay ra'yi ku saabsan kharashaadka daryeelka carruurta ka raadinayaan bixiyeyaasha daryeelka hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xarumaha daryeelka iyo horumarinta carruurta, guryaha daryeelka carruurta qoyska, barnaamijyada qabiilka, iyo daryeel-bixiyeyaasha qoyska, saaxiibada, ama deriska ah ee aan laysin laga rabin, si ay gacan uga geystaan inay fikrad ku biiriyaan sicirada lacag bixinta kaalmada daryeelka carruurta.

**Waxaan u baahanahay inaan maqalno ra'yigaaga!** Fikradaada dhiibo adiga oo ka qayb galaya **Kulanka Fikrad Dhiibashada Khadka Tooska ah** iyo adiga oo buuxinaya **Ra'yiaruurinta Kharashaadka Daryeelka Carruurta.** Tani waa fursaddaada aad ku bixiso macluumaadka ku saabsan waxa dhabta ah ee ku kacaya in la bixiyo daryeel carruur oo tayo leh - ma aha oo kaliya waxa ay qoysasku awoodi karaan inay bixiyaan.

Kulamada Fikrad Dhiibashada Khadka Tooska ah waxaa lagu qaban doonaa luuqadaha Ingiriisiga iyo Isbaanishka (iyo luqadaha kale hadba sidii loo codsado). Ra'yi-aruurinta khadka tooska ah ayaa lagu heli karaa luqado badan.

ISKA DIIWAANGELI KULAMADA FIKRAD DHIIBASHADA EE KHADKA TOOSKA AH

QAADO RA'YI-ARUURINTA QARASHKA DARYEELKA CARRUURTA

**Ka qaybqaatayaasha buuxinaya ra'yi-aruurinta isla markaana ka qayb galaya Kulamada Fikrad Dhiibashada Khadka Tooska ah waxa la gelin doonaa bakhtiyaa-nasiib!**

Booqo www.prenatal5fiscal.org/california si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.
Ma qabtaa su'aalo? Kooxda P5 Fiscal Strategies Team kala xiriir california@prenatal5fiscal.org ama (217) 469-5250.

- English
- Spanish
- Simplified Chinese
- Traditional Chinese
- Arabic
- Russian
- Somali

**c. Ra’yi-aruurinta iyo Kaadhka Boostada ee Kulanka Ra’yi-bixinta**

*Boosto-kaadh le’eg oo la daabici karo oo leh koodhka QR si loo galo ra’yi-aruurinta khadka ah iyo diiwaangelinta kulamada ra’yi-bixinta ee maqalka iyo muuqaalka ah. Hal nooc ayaa lagu habeyn karaa astaan hay’ad.*

<table>
<tr>
<td>5X7<br>Boostada</td>
<td>




</td>
<td>– English<br>– Spanish<br>– Simplified Chinese<br>– Traditional Chinese<br>– Arabic<br>– Russian<br>– Somali</td>
</tr>
<tr>
<td>5X7<br>Boostada oo leh ikhtiyaarka habaynta astaanta</td>
<td>




</td>
<td>– English<br>– Spanish<br>– Simplified Chinese<br>– Traditional Chinese<br>– Arabic<br>– Russian<br>– Somali</td>
</tr>
</table>

| | | |
|---|---|---|
| 4X6 Qoraallada |  | – English<br>– Spanish<br>– Simplified Chinese<br>– Traditional Chinese<br>– Arabic<br>– Russian<br>– Somali |

**d. Su'aalaha Inta Badan La-isweydiiyo**

*Dukumeenti Su'aalaha Inta badan La-Isweydiiyo oo dulmaraya su'aalaha suurtogalka ah ee ku saabsan Kharashka California ee Xannaanada Ilmaha/Hannaanka Habka Beddelka ah.*

| | |
|---|---|
| *Soo Dhawaada* | – English<br>– Spanish<br>– Simplified Chinese<br>– Traditional Chinese<br>– Arabic<br>– Russian<br>– Somali |